HABRAACA NIDAAMKA MAGANGELYODOONKA:

(Mudadu waa iska qiyaas weyna ka badelnaan kartaa sidan)



A-Talo bixin aan qarash aheyn la xiriir NGO Daanishka ee u gargaara Qaxootiga, Borgergade 10, Copenhagen, Arbaca kasta 13:00-15:00. Waxaad kaloo maalin kasta wici kartaa 9:00-15:00: 33735000 ama email u dir: advice@drc.dk (English ama Daanish)

Warbixin muhiim u ah Magangelyo doonka cusub ee yimid Denmark

Talosiin waxtar kuu ah intaad ku gudajirto habraaca magangelyodoonka

Qareen ku kaalmeen maayo bilowga wejiga ugu horeeya ee kiiskaaga, sidaa darteed Waa muhiim inaad wada akhrisaa qoraalkan

Waxaa warsidsahan diyaariyey NGO madaxbanaan iyo Qareenada dadka magangelyodoonka ah:

The Committee for Underground Refugees:
www.flygtningeunderjorden.dk

•

Association of Danish Foreign Law Lawyers:
www.fauadv.dk

•

Amnesti Nu:
www.amnesti-nu.dk

NUQULKA AFSOOMALIGA

Waxaa kaloo jira nuqulo afaf kala duwan sida:
Carabi, Ingriis, Faransiis, Ruush, Isbaanish, Kurdi,
Faarisi iyo Kuruwaat-Serbi-Boosniyaan
Dhamaan nuqulada afafkan kala duwan waxaad ka heleysaa:
www.flygtningeunderjorden.dk + www.fauadv.dk

Translated by: Ahmed A. Omar 'Dharbaxo'

Heshiiska UN-ka ee qaxootinimada wuxuu u qeexayaa qofka qaxootiga ah sidan:
' Waa qof dibedda kaga nool dalkiisa hooyo ama degaan uu ku nagaadnaa; oo ay la gudboonaatay cabsi in lagu tacdiyo ah oo la xiriirta Jinsigiisa, diintiisa, dhalashadiisa, xubin ka ahaanshahiisa urur wadani ah ama mid siyaasi ah; aan awoodin ama dooneynin inuu waajaho tacadiga dalkaas, ama dib ugu laabto cabsi daraadeed'

Laakin si aad u hesho magangelyo Denmark waa inaad ku qancisaa hey'adaha inaad **qatar ku jirtid la taaban karo oo shakhsi ah** – kuma filna inaad shegatid koox dhibanayaal ah ama inaad ka timid dal dagaal ka socdo.

TALAABOOTINKA HABRAACA MAGANGELYODOONKA (eeg bogga ugu danbeya):

Waxaa ugu horeeya **wareysi uu kula yeesho boliiska Daanishka** oo ku saabsan safarkaaga iyo sugnaantaada. Waxay kaloo kaa qaadayaan sawirka farahaaga, waxey badigoobayaan inaad dal kale soo martey ama aad magangelyo soo weydiisatey dal kale oo Yurub ka tirsan, hadii laguugu helana dib baa dalkaas laguugu celinayaa. Haddii kiiskaagu noqdo in lagu tixgeliyo Denmark, waxaa dhaceysa in muddo yar kadib lagaa buxiyo foom oo aad ku cadeyenyso sabataad magangelyada u dalbaneyso.

Muddo kadib **Waaxda Socdaalka** ayaa kula yeelaneyso **wareysi labaad**. Waa halkii aad kaga hadli laheyd sheekadaada oo dhameystiran waana mhiim wax kasta oo aad wareysigaan labaad ku sheegtid. Ugu horeyn waxey ka go'aan gaarayaan in kiiskaagu yahay mid aan daahfurneyn iyo in kale kiisaska noocan ahan way yar tahay fursadda sharciga lagu siiyo, ama waxaa lagaa yaabaa iney diidmo kuu soo tuuraan. Laakin kiiska caadiga ah habraaciisa waxaa laguugu soo dirayaa (Ogolaasho ama diidmo) bilo yar ka dib, ama muddo yara dheer ka dib. Haddii diidmo kuu soo baxdo waxaa kiiskaaga la waregayo **Hogaanka sare ee Imigrashanka,** laakin markaan waxaad xaq u leedahay in **qareen laguu qabto** oo kaa caawiya kiiskaaga, waxaadna xaq u leedahay inaad kala doorato qareenada, weydii dadka aad ku kalsoontahay qareen wanaagsan oo qibrad leh.

Su'aalaha Waaxda Socdaalka ay ku weydiinayaan wareysiga labaad waxaa ka mid ah:

- Sidee dalkaaga uga soo dhooftay? Ma hab sharciyeesan ama mid aan sharci aheyn?

- Maxaa dhacaayo haddii aad ku laabatid?

- Yaa ku daba taagan?

- Weligaa xabsi ma gashay oo malagu xirey – Goormee iyo muddo intee la'eg?

- Ma ka tirsan tahay urur siyaasi ah ama xisbi?

- Ma weydiisatay Booliska dalkaaga iney ku magangeliyaan?

- Aaway reerkaadii iminka?

- Maxaad ugu qixi weysey gobolada kale ee dalkaaga?

KA TAXADIR WAXAAD KU HADLEYSID AMA QORYSID:

Waxkasta aad ku hadashid ama aad u qortid booliiska iyo hogaanada kaleba ogow waa u muhiim fursadaada aad ku heli laheyd magangelyada. Waxaa ku saaran waajib ah inaad hey'adaha maamulka u sheegtid:

- Booliiska Daanishka iyo Waaxda Socdaalkaba waxey sameeyaan gefaf, qaarkoodna waxaa ka muuqda weji xirnaan, laakin **ma ahaa laaluush qaatayaal xoogna ma isticmaalaan**, wixii aad u shegtidna sir ahaan by xifdinayaan. Waa inaadan ka baqin.
- Haddii uu jiro qof aad lacag siisay oo halkan kuu keenay, **iska ilow taladiisa** iyo baqdin gelintiisaba. Badanaa talo xun bay dadka siiyaan kumana soo booqanyaan.
- Haddii qof ku soo xanbaaray iyo haddii **baasaboor** been ah aad ku timidba ka run sheeg.
- **Runta wax walba ka sheeg, xusuusnow waxaad shegtid ama qoro**. Waa leysku fiiriyaa qoraalka iyo wareysiga waxaad ku shegtay, hadaba haddii aad sheekadaadii hore bedeshid ama lagaa helo hadalo iska hor imaanayo waxy u qaadanayaan inaad **been sheegeysid** sidaasaana lagu laabayaa kiiskaaga.
- U diyaargarow inaad si fiican u **sharaxdid** qatarta kuugu imaan karta haddii lagu celiyo.
- Iskudey inaad sheegtid **tafaasiil badan** oo arintaada ah, waxaad heysataa waqti badan.
- Haddii aadan hubin **taariikhaha iyo goobaha**, runta u sheeg oo wax un ha iska qiyaasin.
- Haddii **kufsi, jirdil ama ihaano** horey laguugu sameeyey waa inaad sheegtaa xitaa haddii ay kugu adag tahay.
- Haddii aad **wax uun ilowdid** xilliga wareysiga ama qoraalka, waa inaad warqad afkaaga hooyo ah u qortaa heyadaha rasmiga ah kagana hadashaa wixii aad qaladay. Waxaa aad u fiican inaad la degdegto qoraalka aad wax ku saxeysid.

WAXAAD LEEDAHAY DHOWR XUQUUQ:

- In **koobi** lagaaga sameeyo foomka qoraalka aad ku buuxisey.
- Haddii aad dumar tahay oo aadan ku qanacsaneyn uga sheekeynta arintaada ragga, waxaad xaq u leedahay in laguu keeno gabar ku wareysata iyo **gabar** kaa turjunto.
- Iska hubi in **mutarjumku** si sax ah ugu hadlaayo afkaaga hooyo. Haddii uusan si wanaagsan ugu hadlynin weydiiso mid kale, waayo Isfahan la'aanta waa hoog.

  (Ogow dalbashada mutaarjim kale iyo qof ku wareystoo kale waxay xoogaa dib udhac u keeni kartaa kiiskaaga, laakin waa kuu badbaado)
- Waxaad keensan karta **Goobjooge**, laakin iska hubi inuu yahay qof si fiican u yaqaano daanishka iyo qawaaniinta qaxootinimada.
- **Footo koobi** ka sameeso waxa uu mutarjimku ku qoray afka daanishka, la raadso qof yaqaan oo ha kuu turjumo haddii aad qalad ku aragtid isla markiiba warqad u dir hey'addey quseeso.
- Ha saxiixin **wax qaldan** marka hore iska sax wixii qaldan.
- Haddii lagu **jirdiley** weydiiso in baaris caafimaad laguugula sameeyo Xaruunta Caafimaadka ee (Institute of Forensic Medicine).